

Abriil 17, 2020

Bulshada Qaaliga ah ee Dugsiga Dadweynaha Boston,

Febraayo-dii, [waxaan ku ogeysiinay](#) in Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) waxay baadi goob ugu jirtay tijaabada cusub sedexdeena 'dugsiyada imtixaanka,' Boston Latin Academy, Boston Latin School, iyo John D. O'Bryant School of Mathematics and Science. Seddexdan dugsi sare waxay u adeegaan fasalada 7-12 waxayna u baahan yihiin imtixaan oo qayb ka ah shuruudaha aqbalaada. Imtixaanku wuxuu u furan yahay dhamaan deganayaasha Boston fasalada 6, 8, iyo 9.

Sidii aan horayba u sheegnay, qandaraaska hadda lala galay ururka maareeya tijaabada wuxuu dhacayaa Juun 30, 2020. Qandaraaska dhamaanaya awgiisa, BPS waxay bilaabeen hanaankii lagu soo saari lahaa Codsiga Soo-jeedimaha (RFP) sanad dugsiyeedkii la soo dhaafay, kaas oo sharcigu u baahan yahay si heshiis loola galo ururka imtixaanka aqblaada.

Waxaan siidaynay RFP-dan Febraayo 17-keedii, annagoo ku casuumay ururrada inay soo gudbiyaan qorshayaashooda tijaabada. Taariikhda la filayo in la soo jeediyo waxay ahayd 19-kii Maarso, oo ku dhax jirtay faafitaanka cabuqa hergebka-dabeysaha. Dugsiyada Dadweynaha Boston ma helin wax soo-jeedin tijaabo ah, sidaa darteed BPS waxay dib u qiimeynaysaa RFP si ay u siiso fursad kale oo ay ururada uga jawaabaan. Xilliga kama dambeysta ah ee soo jeedinta la soo gudbin doono waa Meey 15, 2020. Hadafka RFP-da ayaa sii ah xulashada imtixaan cusub oo ku habboon Massachusetts [Farshaxanka Luuqada Ingiriisiga](#) iyo [Xisaabta](#) heerarka iyo xor ka ah eexda.

Waan fahmeynaa xiritaanka dugsiga hadda jira inuu saameyn ku yeelan karo celceliska buundooyinka ardayda (GPA), taasoo ah mid ka mid ah shuruudaha oggolaanshaha. Waxaan ka shaqeyneynaa in aan wax ka qabanno arrintan iyo sidoo kale sida aan u bixin doonno agabyada diyaarinta imtixaanka iyo taageero kale iyada oo loo marayo barnaamijyada sida [Dadaalka Imtixaanka Dugsiga \(ESI\)](#).

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, fadlan kala xiriir Adeegyada Soo-dhaweynta ee examschoolsrfp@bostonpublicschools.org. Macluumaadka ku saabsan hawsha iyo horumarkeena ayaa laga heli doonaa www.bostonpublicschools.org/examrfp.

Waad ku mahadsantahay inaad dooratay Dugsiyada Dadweynaha Boston iyo taageerada aad naga siiseen inaad nagu caawisaan inaan siinno waxbarasho aad u fiican cunugaaga iyo dhammaan ardaydayada.

Nabadgelyo ku joog iyo iskana taxadar,



Dr. Brenda Cassellius
Kormeeraha

